

# Filimka cimiladda > Heshiisyada

## cilimadda

Wada hadalo ayaa dhacay ugu badnaan 20 sanadood iyaddoo ku hoos jirtay daladda Qaramadda Midoobay (UN) haykalkooda shirwaynaha ee ku saabsan isbeddelka cimiladda ee heshiiska cimiladda caalamiga ah. waxa loogu yeedho qaybsiga cullayska weli waa arrinta xudunta u ah heshiiska wada hadalada. Imisa ayuu wadan kastaa dib u jarayaa kaarboonka gaasta greenhouse, oo kumaa bixinaya kharashka? Filimkan waxaanu maalin raacnaa maalinta qofka cimiladda u dhaq dhaqaaqa Lan Marie Nguyen Berg, oo waxaanu wax badan ka baranaa heshiisyada cimiladda, wada hadalada cimiladda tallaabooyinka lagu yaraynayo kaarboonka iyo sida ay dhalinyaraddu uga qayb qadaan lahayd.

## Waajibaadyada la dhammaystirayo ka hor inta aanad daawan filimka

1. Sideee ayay celcelis ahaan heer kulka dunidu isku beddelay muddadii 100 sanadood ee u dambaysay?
2. Sidee ayay wadarta guud ee kaarboonka waxyeelada leh ee CO<sub>2</sub> isku beddeshay muddo isku mid ah?
3. Magacow ugu yaraan shan wadan kuwaas oo hadda uu ku sareeyo kaarboonka waxyeelada leh ee CO<sub>2</sub>?
4. Sababtee ayaad u malaynaysaa in ay adag tahay in laga wada hadlo heshiisyo wanaagsan oo cimilada caalamiga ah?

## Waajibaadyada la xidhiidha filimka

1. Magaalada Rio, sanadii 1992, shirwaynihii cimilada ee Qaramadda Midoobay waxaa saxeexa aqlabiyada wadamada xubnaha ka ah Qaramadda Midoobay. Ka dib baratakoolkii Kyoto ayaa lagaga wada hadlay Kyoto, Japan sanadii 1997. Ku faahfaahi dhowr jumladood waxa ugu muhiimsanaa ee ay ka koobnaayeen labbadaa heshiis.
2. Maxay khasaare wayn u ahayd in Maraykanku aanu saxeexin Borotakoolka Kyoto?
3. Wadamada soo koroya ee saxeexay borotokoolka Kyoto waxay leeyihiin waajibaadyo ka adayg yar oo ay ku yareeyaan kaarboonka waxyeelada yar kuwa ah wadamada qaniga ah. Tiro wadamadaas soo koroya, sida Shiinaha iyo Hindiya, Waxaa dhawaan la soo darsay koboc dhaqaale oo aan caadi ahayn iyo korodh wax ku ool ah oo ah kaarboonka waxyeelada leh ee CO<sub>2</sub>. Sababtee ayaad ugu malaynaysaa in ay adkaan lahayd in wadamadaa laga soo qayb

- geliyo heshiiska cusub ee cilimadda?
4. Wadama badan oo faqiir ah waxay leeyihiin heerar aad u hooseeya oo ah kaarboonka gaasta greenhouse, laakiin waxaa si adag u saameeyay isbeddelada cimilada. Maxay wadamadaas ka dalbanayaa bulshadda caalamiga ah?
  5. Bixi tusaale go'aano siyaasadeed ah oo lagu sameeyay Norway kuwaas oo yarayn kara kaarboonka gaasta greenhouse.
  6. Norway awood ma u yeelatay in ay buuxiso waajibaadyadeeda Borotakoolka Kyoto?
  7. Waa maxay natiijooyinka aadka ugu muhiimsan ee ka soo baxay shir waynahii cimiladda ee lagu qabtay Dooxa sanadii 2012?
  8. Bixi tusaalooyin qaar ka mid ah caqabadaha ugu waa wayn marka laga wada hadlayo heshiiska cimiladda caalamiga ah ee 2015.
  9. Magacow saddex dooddood ee sababta ah in dhalinyaradu ay ka qayb qaadato wada hadalada cimiladda.
  10. Diyaarso codsigaaga waxa loo baahanyahay in lagu joojiyo cimiladda kululaanaysa ee adduunka.

## Waajibaadyo la sii xoojiyay

1. Borotakoolka Kyoto waxa uu wadamada u ogolaadaa ku waas oo yaraynaya kaarboonka, in ay tan u sameeyaan habab kale iyaga oo yaraynaya kaarboonka ka baxa gudaha wadamadooda. Heshiisku waxa uu ku furmaa saddex nidaam kuwaas oo dheeraad ku ah tallaabooyinka qaranka, oo ujeedadiisu tahay in laga sii raqiisiyo si loo gaadho yoolka cimiladda. Nidaamyadan waa Xadka Kaarboonka la Oggolyahay, Nidaamka Horumarka Nadiifta ah (CDM) iyo Fulinta Wada jirka ah (JI).
  - a) Sharax ujeedada saddexdan nidaam.
  - b) Dhaleecaynta waxaa lagu simmay nidaamka sheega in aanay u shaqayn habka loogu talo galay. Bixi tusaale aasaaska dhaleecaynta.
2. Sababtee ayay ugu adagtahay Maraykanka in ay ansaxiso heshiisyada cimiladda ee caalamiga ah?
3. Qiimee xigashooyinka hoose oo qor qoraal kooban oo ka hadlaya masuuliyadaha Shiinaha iyo Norway ee khuseeya kaarboonka gaasta greenhouse.
  - "Norway waxay ka dhigantahay boqolkiiba hal miridh ee wadarta guud ee kaarboonka dunidda! Shiinahu waxa uu furaa wax ku dhow labbada xarumaha korontadda dhuxusha ah toddobaadkii; mid ka mid ah waxa uu wasikheeyaa hawadda wax ka bada dhammaan qoyska gudaha Norway oo la isku daray." (FpU)
  - "Norway waxay sii daysaa in ka badan gaaska greenhouse qofkiiba oo ka badan Shiinaha!" (Grønn Ungdom)